DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

GARYAQAANKA GUUD EE PUNTLAND

# XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE PUNTLAND

## SOLICITOR GENERAL OFFICE

## مكتب المحامي العام للدولة

# SHARCIGA GUDDIGA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DOWLADDA PUNTLAND

## FAAFINTA RASMIGA AH
## OFFICIAL GAZAETTE
## الجريدة الرسمية

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Puntland, Address: Madaxtooyada Puntland, Garowe
Email:gg.pl@plstate.so

**DOWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**XAFIISKA**
**GARYAQAANKA GUUD**

**ولاية بونت لاند**
**الصومالية**
**مكتب**
**المحامي العام للدولة**

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 19AAD | CADADKA 8AAD | TAARIIKH: 08/10/2019 | Lam. 04 |
|---|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

# OFFICIAL GAZETTE

# الجريدة الرسمية

## SHARCIGA GUDDIGA SHAQAALA RAYIDKA AH EE DOWLADDA PUNTLAND

## TUSMADA


| | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Sharciga Guddiga Shaqaala Rayidka ah Dowladda Puntland** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha<br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr.2 ee August 10, 2019, kuna saabsan sharciga Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80aad

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/76/2019, kuna taariikhaysan 29/07/2019.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimada xeerkani u leeyahay Dowladda Puntland

**Wuxuu soo saaray**

Sharciga soo socda:

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeeyn **Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah** ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda.

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal Sharcigan wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Dr. Sicid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

*Ref:-*XGGW/DPL/76/2019 Garoowe, Isniin Date:- 29/07/2019

**Ku: Madaxweynaha Dawladda Puntland**

**Garoowe**

**Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah Ee Dawladda Puntland**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64**-aad.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha **Ref:** MW/DPS/576/2018 ee August 16,2018 kuna saabsan soo gudbin Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Puntland.

**MARKUU TIXGELIYEY:-** Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Doodii iyo Go'aankii ee Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhiga 44-aad Fadhigiisii 20-aad ee **23/07/2019** Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda Puntland.

**Wuxuu Guddoomiyey:-**

**Ansixinta Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland**

**Allaa Mahad Leh**

**Md. Cabdixakiin Maxamed Axmed (Dhoobo)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.**

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

Tell:- +252 90 7792030, Email: qoobleex09@gmail.com Website:- www.puntlandparliament.net

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بو نت لاند الصومال

GOLAHA WAKIILADA

مجلس النواب

# XEERKA GUDDIGA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DAWLADDA PUNTLAND

**July 2019**

**Garoowe, Puntland**

# Tusmo

Bogga

Qodobka 1-aad_Erey Bixin ........................................................................................ 2
Qodobka 2-aad Magaca iyo ujeeddada Xeerka ........................................................................ 2
Qodobka 3-aad_Ujeeddooyinka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda .................................. 3
Qodobka 4-aad_Xarunta Guddiga ........................................................................................ 3
Qodobka 5-aad_Madax-bannaanida Guddiga ........................................................................... 3
Qodobka 6-aad_Tirada Xubnaha Guddiga .............................................................................. 4
Qodobka 7-aad_Fadhiyada iyo Go'aannada Guddiga ................................................................. 4
Qodobka 8-aad Guddiga Goobta Shaqada ............................................................................... 4
Qodobka 9-aad_Qaab-dhismeedka Guddiga ............................................................................. 4
Qodobka 10-aad Magacaabista iyo xil ka qaadista xubnaha Guddiga .............................................. 5
Qodobka 11-aad_Shuruudaha lagaga mid noqon karo Guddiga ......................................................... 5
Qodobka 12-aad Xilka iyo Waajibaadka Shaqo ee Guddiga ............................................................. 5
Qodobka 13-aad_Xilka guddoomiyaha Guddiga shaqaalaha rayidka ah ee dawladda ................................ 6
Qodobka 14-aad Xilka Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga ................................................................ 7
Qodobka 15-aad_Sababaha lagu lumin karo Xubinnimada Guddiga ....................................................... 7
Qodobka 16-aad_Xiriirka iyo wada shaqeynta Guddiga shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda iyo Wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhalinyarada iyo ciyaaraha ........................................ 8
Qodobka 17-aad_Wada shaqeynta Guddiga iyo hay`addaha Kale ........................................................... 8
Qodobka 18-aad_Waxyaalaha ka reeban xubnaha Guddiga ................................................................ 8
Qodobka 19-aad_Warbixinnada Wax qabadka GuddigaShaqaalaha rayidka ah ee Dawladda . 9
Qodobka 20-aad_Dhaarta Xubnaha Guddiga ................................................................................ 9
Qodobka 21-aad Burin ............................................................................................................ 9
Qodobka 22-aad Dhaqan galka Xeerka .......................................................................................... 9

# XEERKA GUDDIGA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DAWLADDA PUNTLAND

## Qodobka 1-aad
## Erey Bixin

Micnaha ereyada hoos ku qoran haddii aan xeerkan dhexdiisa si kale loogu fasirin waxaa loola jeedaa sida soo socota:

**Guddi:** Waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.

**Wasaarad:** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo Ciyaaraha.

**Urur:** Waxaa loola jeedaa ururada wadaniga ah iyo kuwa caalamiga ah.

**Guddoomiye:** Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda Puntland.

**Agaasime:** Waxaa loola jeedaa madaxa xafiiska agaasinka ee Guddiga.

## Qodobka 2-aad
## Magaca iyo ujeeddada Xeerka

Xeerkan waxa lagu Magacaabaa Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.

Xeerkan waxaa lagu asaasayaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.

Shaqaalaha Guddigani leeyahay maamulkooda iyo maareyntooda waa Shaqaalaha Rayidka ah ee uu qeexayo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.

Awoodda Xeerkani waxay ku baahsan tahay dhulka Puntland oo dhan wuxuuna khuseeyaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland sida ku qeexan farqadaha 1-aad iyo 2-aad ee isla qodobkan.

## Qodobka 3-aad
## Ujeeddooyinka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda

Ujeeddooyinka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda loo dhisay waa:

1. In uu hirgeliyo hannaan iyo hab toosan oo kor loogu qaadayo doorka wax–u qabad iyo daryeel ee nolosha shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda Puntland, si waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawlada Puntland.
2. In uu xoojiyo isku duubnida, isku xirnaanshaha iyo iska warqabka Shaqaalaha Rayidka ah.
3. In uu gaarsiiyo una sharaxo xeerarka, wareegtooyinka iyo arrimaha maamulka ee Dawladda oo ku wajahnaan kara Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda
4. In uu wacyigeliyo lana socodsiiyo Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda hadba sida ay tahay xaaladda dalku ku sugan yahay xagga siyaasadda, dhaqaalaha, guulaha la gaaray, dhibaatooyinka taagan wax-kaqabadkana u baahan iyo macluumaad kasta oo iyaga khuseyn kara.

## Qodobka 4-aad
## Xarunta Guddiga

Xarunta Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee DPL waa Magaala madaxda Dawladda Puntland ee Garoowe, waxayna laamo iyo xafiisyo ku yeelan karaan Gobollada kale ee Puntland.

## Qodobka 5-aad
## Madax-bannaanida Guddiga

Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah waa Guddi leh madax-bannaani maamul iyo go'aan ka gaarid hawlaha la xiriira Shaqaalaha Rayidka ah ee dawladda Puntland, wuxuuna u hoggaansamayaa Sharciga oo kaliya, waxayna xilkooda u gudanayaan si waafaqsan Dastuurka, Xeerka Shaaqalaha rayidka ah iyo Xeerarka kale ee Dawladda Puntland, waxayna siyaasad ahaan u hoos tegayaan Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Cayaaraha Puntland.

## Qodobka 6-aad
## Tirada Xubnaha Guddiga

1. Tirada Xubnaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah waxay noqonaysaa Todoba xubnood (7) oo ay ku jiraan Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenku.
2. Xubnaha Guddiga waa in ay dumar ku jiraan.

## Qodobka 7-aad
## Fadhiyada iyo Go'aannada Guddiga

1. Guddigu waxay kulan fadhi yeelanayaan labadii asbuuc hal mar, waxayna yeelan karaan fadhiyo aan caadi ahayn markii loo baahdo.
2. Fadhiyada Guddigu waxay ku ansaxayaan marka ay ka soo qayb-galaan ugu yaraan afar (4) Xubnood oo uu Guddoomiyuhu ku jiro.
3. Fadhiyada aan caadiga ahayn waxaa dalbi kara Guddoomiyaha ama ugu yaraan saddex-meelood labo 2/3 xubnaha guddiga.
4. Go'aannada guddigu waxay ku ansaxayaan cod hal-dheeri ah, haddiise natiijada tirada codadku is le'ekaato laba wareeg, waxaa mar saddexaadka cod hal-dheeri ah yeelanaya Guddoomiyaha.

## Qodobka 8-aad
## Guddiga Goobta Shaqada

Goob kasta oo shaqo dawladeed waxay yeelanaysaa guddi goob-shaqo oo ilaalinaya danaha shaqaalaha rayidka ah ee goobtaas, sida uu qabo qodobka 20-aad farqadiisa 3-aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah.

## Qodobka 9-aad
## Qaab-dhismeedka Guddiga

Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland wuxuu yeelanayaa kana koobnaan doonaa xafiisyada hoos ku qoran:-

1. Xafiiska Guddoomiyaha Guddiga
2. Xafiiska Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga

1. Xafiisyada agaasimayaasha Guddiga oo tiradoodu iyo mihnadooda shaqo ku xiran tahay hadba baahida loo qabo iyo awoodda dhaqaale oo lagu hirgelin karo.

## Qodobka 10-aad
## Magacaabista iyo Xil ka qaadista Xubnaha Guddiga

Guddoomiyaha, Guddoomiye ku-xigeenka iyo xubnaha kale ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda waxaa lagu magacaabayaa xilkana looga qaadayaa dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha Dawladda Puntland.

## Qodobka 11-aad
## Shuruudaha lagaga mid noqon karo Guddiga

Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah waxaa ka mid noqon kara qof kasta oo buuxiya shuruudaha soo socda;

1. Inuu yahay muwaadin u dhashay Puntland ama Puntlannimada ku helay qaab sharci ah.
2. In aan da'diisu ka yarayn sodon sano (30).
3. Inuu haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsanyahay.
4. Inuu ka fayow yahay qabinna cudur aanu la gudan karin waajibaadkiisa shaqo.
5. Inuu leeyahay waayo aragnimo shaqo dawladeed ugu yaraan sadex sano (3 sano).
6. Waa in uusan ka mid ahayn urur ama xisbi siyaasadeed.
7. Inaan maxkamadi ku ridin xukun kama dambays ah oo ka reebaya inuu qabto shaqo dawladeed.
8. In uu dhaqan iyo anshax suuban ku leeyahay Bulshada dhexdeeda.

## Qodobka 12-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Shaqo ee Guddiga

Xilka iyo Waajibaadka Shaqo ee Guddiga waxa ka mid ah;-

1. Maamulidda hawlaha la xiriira shaqaalaha rayidka ah ee dowladda, si waafaqsan xeerka shaqaalaha rayidka ah.
2. Maamulidda iyo hoggaaminta guddiga qaadaya tartanka imtixaanka shaqaaleynta shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda.

3. Ka qayb-qaadashada anshax marinta Shaqaalaha Rayidka ah ee ay soo jeediyeen hay'adaha ku shaqada leh laguna helay inay galeen fal-dembiyeed maamul, si waafaqsan xeerka shaqaalaha rayidka ah.
4. Ka talo bixinta hindise xeereedyada loo samaynayo shaqaalaha rayidka ah ee dawladda Puntland.
5. Soo saarista wareegtooyin, tusaalooyin, tilmaamo iyo nidaamyo dhiirigelinaya doorka wacan ee Shaqaalaha Rayidka ah ee dawladdu ka qaadan karaan horumarinta dhinacyada kala duwan oo ay ka kooban tahay dawladda Puntland.
6. Dhawrista iyo ku dhaqanka Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda Puntland.
7. Keydinta iyo xafidida sirta, diiwaannada iyo galalka shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda.
8. U-hawl-galka ururinta, keydinta macluumaadka iyo xogta ku saabsan shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda sida aqoontooda, xirfadooda shaqo iyo waayo aragnimadooda.
9. Soo saarista iyo Taabba-gelinta warbixinno saddex biloodle iyo sanadle ah iyo daraasad la xiriirta hawl-qabadka Guddiga shaqaalaha rayidka ah ee dawladda, sida ku cad qodobka 20-aad ee isla xeerkan.
10. Ka gacan-siinta shaqaalaha rayidka ah ee dawladda xal u helidda dhibaatooyinka la soo gudboonaada.

## Qodobka 13-aad
## Xilka Guddoomiyaha Guddiga shaqaalaha rayidka ah ee dawladda

Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawlada Puntland wuxuu; -

1. Guddoonshaa shirarka guddiga shaqaalaha rayidka ah ee Dawlada Puntland
2. Diyaarshaa ajandaha iyo mawduucyada shir kasta oo Guddigu yeelanayo, isagoo la tashanaya Guddoomiye ku-xigeenka.
3. U hawlgalaa la socodka meelmarinta go`aannada Guddigu gaaro iyo dhaqangalkooda.
4. Ka shaqeeyaa xoojinta iyo isku duubnida xubnaha guddigu ka kooban yahay iyo hay`addaha ay ka tirsan yihiin shaqaalaha Guddigu ku hawlan yahay maamulkooda.
5. Ku metelaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda xagga Shirarka gudaha iyo dibedaba, haddii uusan cid kale u wakiilan.

Kormeeraa sugnaanta habsami u socodka hawlaha guddigu ansixiyey iyo dhammaan hawlaha xafiisyada iyo shaqaalaha hoos yimaada Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.

Wuxu saxiixaa go'aammada Guddiga.

## Qodobka 14-aad
## Xilka Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga

Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee dawladdu wuxuu;

Qabtaa xilka guddoomiyaha marka uu Dalka (Puntland) ka maqan yahay guddoomiyuhu si ku meelgaar ah, ama uusan xilkiisa gudan karin sabab kasta ha ku timaadee.

Kala taliyaa guddoomiyaha Guddiga hawlaha la xiriira shaqada Guddiga.

Qabtaa, fuliyaana hawlaha guddoomiyuhu u wakiisho oo aan ka baxsanayn awooddiisa shaqo.

## Qodobka 15-aad
## Sababaha lagu lumin karo Xubinnimada Guddiga

Xubinnimadda guddiga shaqaalaha rayidka ah waxaa lagu lumin karaa haddii: -

1. Ay Xubintu geeriyooto.
2. Ay la soo gudboonaato xaalad xil-gudasho la'aaneed oo joogto ah.
3. Xubintu ay istiqaalo keento.
4. Xubintu ka maqnaato laba fadhi oo is xiga oo caadi ah shirarka guddiga sababla'aan.
5. Ay la timaado musuqmaasuq, laaluush, eex iyo xadgudub kasta oo ka hor imaanaya Shareecada Islaamka, Dastuurka, Xeerka shaqaalaha rayidka ah iyo qawaaninta kale ee Puntland.
6. Ay la timaado anshax-xumo iyo fadeexo baahsan oo dhaawacaysa sharafta iyo haybadda Guddiga oo ay soo xaqiijiyeen guddi uu Madaxweynaha Puntland u magacaabay arinta ku xusan farqadan.
7. Ay xubinta maxkamadi ku xukuntay xukun ciqaabeed kama dambays ah oo ka reebaya qabashada shaqo dawladeed.

## Qodobka 16-aad
## Xiriirka iyo wada shaqeynta Guddiga shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda iyo Wasaaradda shaqada, shaqaalaha, dhallinyarada iyo ciyaaraha

Xiriirka iyo wada shaqeynta Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda iyo Wasaaraddu waa mid ku dhisan isku kalsooni iyo wada shaqeyn wanaagsan oo uu daneynaya shaqada iyo shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda iyo guud ahaan Puntland, waxayna u hoggaansamayaan Dastuurka, Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawlada iyo Xeer nidaamiyaahiisa.

## Qodobka 17-aad
## Wada shaqeynta Guddiga iyo hay`adaha Kale

Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladdu wuxuu u-hawl-gelayaa siduu xiriir wanaagsan ula yeelan lahaa: -

1. Dhammaan hay`adaha ay ka tirsan yihiin shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Puntland.
2. Ururada iyo guddiyada kale ee Soomaaliyeed taas oo saameyn wax ku oolnimo ku yeelan karta is fahamka iyo wax wada qabsiga Shaqaalaha, gaar ahaan iyo Soomaalida guud ahaan.

## Qodobka 18-aad
## Waxyaalaha ka reeban xubnaha Guddiga

Xubin kasta oo ka tirsan Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda waxaa ka reeban inay: -

1. Si xun u-isticmaasho Shaqada ay hayso si ay uga faa'iideysato danaheeda gaarka ah ama dano cid kale.
2. Aqbasho hadiyado, marti-qaadyo ama qaadato faa'iidooyin kale oo saameyn ku yeelan kara go`aannadeeda ama wax u dhimi kara sharafteeda iyo haybadda Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda.
3. Fasax la'aan bixiso ama sheegto sirta, macluumaadka iyo xogta rasmiga ah ee shaqada xataa marka ay ka tagto.

## Qodobka 19-aad
## Warbixinnada Wax qabadka Guddiga
## Shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda

1. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda wuxuu soo saarayaa warbixin saddex biloodle ah iyo mid sanadle ah oo uu soo saarayo sanad kasta bisha Diisembar, wuxuuna u gudbinayaa Madaxtooyada Dawladda Puntland iyo Wasaaradda Shaqada, Shaqaaalaha, Dhallinyarada iyo Cayaaraha.

2. Warbixinnada Guddigu waxay ka xog waramayaan:

b) Hawl-qabadka guddiga ee saddex biloodlaha ah iyo sanadka dhammaaday, sida warbixinta hawlaha u qabsoomay iyo caqabadaha la soo gudboonaaday oo lala socodsiin waayey hawlaha fulintoodii dib- u dhacu ku yimid.

t) Heerka shaqaaluhu kaga jiraan tartanka horumarinta Puntland iyo xaaladda guud ee shaqaalahu ku sugan yihiin dhinac kasta oo laga eego.

j) Qorshaha Guddiga ee ku aaddan hawl-qabadkiisa sanadka cusub.

## Qodobka 20-aad
## Dhaarta Xubnaha Guddiga

Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda inta aysan billaabin qabashada xilka loo magacaabay waxay maraysaa dhaarta ku xusan qodobka 132 –aad ee Dastuurka Dawladda Puntland waxaana dhaarinaya garsoore ka tirsan Maxkamadda Sare, waxaana lagu hor dhaarinayaa Madaxwaynaha Dawaladda Puntland.

## Qodobka 21-aad
## Burin

Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin Xeerkan.

## Qodobka 22-aad
## Dhaqan galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.